Waxaa jira dad taga qabuurta oo yiraahda:" haddii muraadkeyga aan soo helo waxaan sheegay xoolahaas ama xoolo nool ha ahaadeen ama lacag ama dhar". Dadkaas muraadkaas ama dad ha u sheegaan ama niyadda ha ku qarsadaane. Taas oo ah inay cudur haya ha ka turraanteen oo ay AWLIYADA u sheegaan oo shardi ka soo xirtaan oo ay yiraahdaan haddaan ka raysto waxaa bixinayaa waxaas iyo waxaas ama qofkaas waxaa dhici karta inuu ilmo waayey ee shardiga u xirto inuu ilmo helo. Intaas waxaa dheer, soomaalida xawaalaha waa ka baqdaa cawadii inay agseexato. Yacni adoo safar ah haddii oo aad xawaalo ku aaddo inaad ka leexat oo meel kale seexato ayey jeceshahay soomaalidu. Waxaa jira ayagana dad yiraahda xawaalaha waxaa ka qeyliya geeri ama dab baa laga shidaa. Xaaji waxaan kaa rabnaa inaad wax ka tiraahdo labadaas arrimood ama suaalood.

Xaaji Maxamad

Middaas aad i weydiinayso,waxa waaye, dadka ictiqaadkooda. Naftu qofka hadday ka dhacdo, intaas uu ruuxu xayi yahay waa la fadhiisan kartaa . Laakiin haddii ruuxaanu ka baxo intii kaddibkiisa ah inaad agseexato ma tuwaadid. Naftaa nafta ka carareysa oo naftey weheshan lahayd ayaa ka maqan meesha. Naftey weheshan lahayd oo ka maqanna meedkiiyoo keligiis ah oo jasad engegan ah naftu waa ka infiraaree oo waa infiraarkaas waxa cabsida keenaya oo sidii uu ahaa berigii hore ee uu u bilawdow berigaanna yahay ee xawaalaha aan la agseexeynin ama geeriyaa ka qeyleysa la leeyahay, qofka ictiqqadkiisaa waxaa ku beeran meeshatan haddii naftii ka tagtay intii ka dibkeeda ah wax kalaa ku beeran. Haddaba wax kasta waxay ku xiran yihiin ictiqaadka qofku leeyahay. Shardi xirashada la xiranayo, haddaan waxaas helo waxaasan baxaa iyo ictiqaadka aad leedahay:" Ilaahayow haddii waxaas aan helo waxaas inaan bixiyo SADAQADA ah aan ama ku NIDRAY ama aan SHARDIYEY ama aan YABOOHAY", hadallada saas ah hadday ictiqaadka waxa laga baryaayo waxa aad wax ka dooneyso hadday ILAAH yihiin waa IBAAXADII; haddii qof aadane ah inay ku siin karto aad qabtane waa ibaaxala'aantii. Adigu hadalkaaga sida uu yahay u fiirso oo haddii ibaaxadii la banneeyayoo Ilaahay kuu banneeyey ku dhex jirana sidii Ilaahay kaa ballan qaaday ayaad heleysaa; haddise aadan ibaaxadadii ku dhex jirinna, nin aan ibaaxa ku jirin oo wax la xaaraantinimeeyey ku dhex jira ayaad tahay. Hadalka aad ku hadleyso haddaad Ilaah ka baryeydana waa bannaan yahay, haddii aadane inuu wax ku siin karo uu yahayna aadane waxba kuma siin karo.

Anigu waxaan doonayaa inaan doodda ku darsado in yar oo ku saabsan siyaaradan qubuurta. Horta waxakani wax innaga inugu eg ma ahan, wax Islaanka intuu joogo ku egna ma aha. Waxaan waa wax soo jiri jiray, diimaha kale ee muqaddaska ah dadka haystaana waa ku isticmaalaan, dadka aan diimaha muqaddaska ah haysanin oo cawaanta ahna waa ku isticmaalaan. Tusaale arrintaas la xiriirta waxaa noogu dhow Kiinyadan dadka deggen qabiilka ugu weyn oo Kuukuuyada la yiraahdo nin ka dhashay buug

uu ka qoray Jooma Keenyaatihii madaxweynaha u ahaan jiray uu ku magacaabayo buugga "Qabiilkeyga Kukuuyo". Markaad akhriso buuggaaas waxaad arkaysaa dadkaas inay diin u tahay oo ay caabudaadoodii oo dhan ay isugu timid, dadkii waayeelka ahaa oo ayagu ay ka soo askunmeen oo dhintay arwaaxdoodii inay caabudaan, in xoolo loo qalo, in la isugu tago, in ayaga la baryo oo wax kasta la weydiisto, in dhibaatada kuu timaada ay ayagu kuu keeneen, in khayrka aad hesho ayagu kuu keeneen. Marka, qabuurtaan la siyaarto waxaan qabaa in ay tahay wax dunidoo idil isaga faafsan. Soomaalida, marka aan u soo noqdo. Xaajigu markuu ka warramaayey siyaarada qubuurta, badanaaba waxaad moodaa fikraddu inay u badnayd dadka xooladhaqatada ah sida ay u arkaan oo ka duwan dadka beeraleyda u badan ee ku nool Shabeellayaasha iyo sida ay qubuurta u siyaartaan.

Suaalo yaryar oo gaagaaban ayaan doonayaa inaan weydiiyo ee laga eegayo xag dhaqan iyo xag diimeed labada. Horta marka ugu horreysa su'aasheyda waxa waaye: ruux dhintay oo god galay wax ma yuwaad? Wax ma kuu galaa waxse ma kuu gooyaa? Xag diimeed xaajigaa ka jawaabay oo waa maya. Markaan isla sheekeysanayno waxaad u maleynaysaa inaan leenahay waa maya, laakiin hadhow markay kali kali noqoto ama markaan meelo isugu tagno waa haa oo waxaad arkaysaa " awoowow waxaas ii yeel" ayadoo la leeyahay; "abkeeyow waxaas ii yeel" ayadoo la leeyahay oo awood la siinayo, ayadoo qofka markuu kufo "Sheekh Cabdulqaadirow; Sheekh Aweesow" uu leeyahay, meeshuu "Allow i bixi" ka dhihi lahaa. Horta taas waxaan doonayaa in la faahfaahiyo, xag diimeed sheekhaa ka jawaabay oo waa maya, xag dhaqameed bal inaan iska tusinno. Su'aasha labaad oo aan qabaa waxa waaye: caadooyinkan qabuurta la siyaaranayo waxaan qabaa inay jiraan qaar ka yimid diimihii kale oo matelan Masiixiga. Taas waxaan ku rumeysanahay, Jilib iyo Jamaame markaad tagto waxaa jira dad la siyaarto oo dadkaas qabrigoodaa waxaa laga soo qaataa ciid. Ciidaas qabriga laga soo qaaday faraqaa lagu xirtaa waana la cunaa oo waxaa la yiraah calooshaad intay ku jirto haddaad dhimato naar geli meeysid. Waxaa kaloo jirta in calaamad ciid gaduudan ah oo sida macatabkii ah, wajiga la isaga sameeyaa oo "jaahaada balaayo ka hor imaan mayso" ayaa la qabaa, haddii aad calaamaddaas wajiga ku dhigato oo waa balaayo xijaab. Tii kale oo aan ku deri lahaa xaajigaaba hore uga jawaabay oo waa middan ahayd qubuurta wax lagu xiranayo oo la leeyahay: "Sheekh hebelow waxaas ayaan kaa baryaa". Taas Sheekhaa ka jawaabayoo niyada ruuxa ayaa la qiimagelinayaa baa la yiri. Waxaa sheekha iigu dhiman oo aan weydiinayaa: marka ay meytakaalada tahay, soomaalida waxaa u caado ah, bisha Mawliid inay xoolaha wada qalaan oo nin waliba yiraahdo waalidkey ayaan wax u bixinayaa, bilawgeeda ilaa dhammaadkeeda inta u dhexeysa. Waxaan jeclaan lahaa taa waxa loo cuskado oo loo doortay. Sheekha haddaayo warkiisa waxa ka mid ahaa wixii aan lagu gowricin magaca Ilaahay waa xaaraan, waxaana ognahay, neef inta la soo qabto in la yiraahdo:"neefkaanu waa neefka aabbahey aan u bixinayey xaggaa halla geeyo oo halla gowraco". Anigu

qasdigeyga markaan la soo muraaday, wixii aan neefkaas xerada uga soo saaray ama aan suuqa uga soo iibiyey wuxuu ahaa inaan ula muraaday Sheekh hebel ama aabbahay ama Weligii aan ka galay sharadka ee saddaqo ma ahayn oo Ilaahay wajigiisa u bixiyey oo waxaan u maleynayaa in qasdiga u ahaa magaca aan ku soo maquuniyey oo ahaa waalidkii aan wax u bixinayey ama weligii aan siyaaranayey. Marka su'aalaheygii intaas ayaan ku soo koobaya oo xag diineed sheekha wax ha ka taabto, dabadeedna aan u bandhigo odayaasha.

Soo dhexgal — Raali iga ahaada. Waxaan u maleynayaa jaalle Maxamad Siyaad Ciise markuu noo soo diyaarinayo barnaamijka, maskaxda wuxuu ku haayaa inuu odayaasha iyo culumada keyd dhaqan oo isugu jira diin iyo dhaqan in laga sameeyo oo uu rikoor noo ahaado. Marka masalada aan ka hadlayno, dhan kasta aan ka fiirinno, dhanka dhaqanna waa saan, dhan diimeedne waa saan, meeshaanna waa isku waafaqasan yihiin, meeshaanna waa iska diidan yihiin; hase yeeshee annagaa leh oo ay arrintu sidaas ku socoto. Waa mahadsan tihiin.

Sheekh Maxamad — Waxaan ka bilaabayaa suaashii ahayd:" bisha Mawliid maxaa loogu aaddiyey Allabariga ". Bisha Mawliid waxaa loogu aadiyey waxay tahay: bisha Mawliid 12keeda Nabigaa ku dhashay oo waa muggii Ilaahay, addoomankaas, nabigii la doortay oo aakhirul ambiyaha ahaa oo kheyru khalqillaahi ahaa yoonkii uu dhashay iyo bishii uu ku dhashay ayaa bilaha ka sharaf badiday, yoonkiina yoomankuu ka sharaf badiyey. Kolkaasey dadku sadaqada ay baxaayaa, iyo waalidka ay xusaayaan iyo Nabiga ay xusaayaan ayey nabigoodii ku aadsadeen xuskiisii waalidka xuskiisiina ay sadaqadii la doonteen. Siddedana bishu bilaha kaley ka shaf badnayd, yoonkuna ayaamaha kale ka sharaf badan yahay, tirsuguna tirsiga uu ka sharaf badan yahay. Sababta loogu aadiyey waa saas ee shay kale lala ma doonan. Tafaawul ay ka rabaan in muraadka ay leeyihiin uusan gefid yeelan ayeey Mawluudka iyo ciidda ay ula doontaan xuska iyo muraadka ama sadaqada. Haddaayo hadalkii ahaa waxaa ku jiray: " masoome masalaade, iid ma tukade aa ka daran". Fasirkeeda anoon aad idiin siin maahmaahdaas, yaan mid kale u weecannay. Waxay sidaa ku yiriheen: asagoon dukan qofku yaa waxaa suurowdo, labada ciidood inuu inta qubeysto oo soo weysoqaato ama loo weysoqaado oo uu meesha soo fariisto ee uu salaaddaas wax ka dukadaa. Ninaa wuxuu yiri:" Aw Shiikhow i waani oo soonna ha dhihin, salaadna ha i dhihin". Hadda wuxuu yiri: "hadday sidaa tahay xishoo. Anigu soon kuma lihi, salaadna kuma lihi laakiin xishoo". Ninkii waa fiirsadoo wuxuu yir:"Nin xishooday ummaddoo afduuban horteeda oo sooman cunno kuma cuni karo; nin xishoodayna ummaddoo safatay oo Ilaahay wajigii u jeesatay, kaligii meel kuma heri karo". Waxay ka xishoodeen, berigaas ummadda wax ka maqan aan la arag, inay heraan oo ay salaadda iyo soonka ka haraan ay ka xishoodeen. Markaasaa waxay yiraaheen:" masoome masalaade, iid ma dukadaa ka liita ". Waxaa suuragal ah yoonkaas la sheegay oo la sharfay, inuu

ummaddaas cafiga la cafiyey, ijtimaaca ah, soo gelidda uu soo galay lagu cafiyaa, illeyn waa yoom Ilaahay addoomankiisa uu xureyhayo. Maxaa yeelay waxaa la yiri: "soddonka soonqaad, layladiiba, kun naar waajibsatay aa la xureeyaa, yoonka ciidaadna soddonkeeda intii la xureeyaa la xureeyaa". Mugga meeshaas la isku xurenayo oo ummaddii isugu timid oo Ilaahay loogu toowbad-keenay oo uu Ilaahay yaboohay ee uu markaa Nabigu yiri: " ninkii dembi ka toowbakeena asaga oo aan dembi lahayn ayuu la too yahay " ee uu yiri Ilaahay" ninkii i dalbaa waa i helaa". Haatan sidii xasanaad lagu jeri karo in lagu jeriyo, sidii dembi lagu yareeyn karana lagu yareeyo waa ma'muur la is faray. Tan ah in wixii la gawracayo magaca Ilaahay lagu gawraco waa in marka neefka la gawracayo lagu bilaabo "Bismillaa". Qofku ha yiraahdo ". adoogeyaan u bixiyey, hooyaan u bixiyey ha dhaho laakiin waxaa u shardi ah inuu yiraahdo "Bismillaahi Raxmaani Raxiim" oo bisinka Ilaahuu ku gawracaa, waxaan bisinka Ilaah lagu gawricinna waxay yihiinba ma leh. Dadku waa yaqaan oo Bisinka waa lagu gawracaa.

Shirguddoomiyaha: Bal haatanna, Dhegaweyne suaalaha iyo hadallada uu soo wato aanu wada dhegeysanno.

Dhegaweyne: Mahadsanid Fiqi Buraalow. Anigu wax kale meeshan kuma soo qaadin, dadkuna CAAMO iyo CULUMO ayuu isugu jiray soomaalidu, kii reer baadiyaha ayuun baan ka eegay. Sheekh Maxamad wuxuu yiri lafo aboor cunay waaye meeshii XABAASHU ku tiilloo waa khali xabaashii. Xabaashan annagu waxay noo ahayd, ruuxii oo labisan inuu noo dhex fadhiyo oo uu na maqlayo. Saatan ayaan u la sheekeysan jirnay, waxa aanu oran jirnayna haddaan idiin sheegayaa. Ducadaan ku duceysan jirnay waxay ahayd: "Ilaahow waxaan idiin bixinno aanan idiin waayin. Ilaahow, idinkana aadan duco noo waayin".

Shirguddoomiyaha: Waa tahay, bal sheekha aanu u gudbinno.

Sheekh Maxamad: Waxa waaye, Dhegaweynow hadalkaas aad leedahay, meeydkii meesha kuma jiro, ruuxiina kuma jiro. Laakiin RUWAAYAA jirta: Malag Malaaigta ka mid ah oo wakiil ka ah meeydkaas ay ARWAAXDIISU BARSAQA jirta oo barsaqa gaarsiiya yaa meel la arkaba taagan oo jawaabta qaadahaya(meeydkii iyo ruuxii midna meesha kuma jira laakiin wakiil tabliiqa gaarsiiya ayaa u jooga oo wakiil ah).

Soo dhexgal: Xaajiyow, Xadiisaa jira oo aad iiga aqoon badan tahay oo wuxuu leeyahay " Haddii qofka banii aadamka ahi dhinto, hawshiisii oo dhan (camalkiisa) waa dhammaataa illaa saddex mooyee oo kala ah: SADAQO joogta ah(tusaale masaajiduu sameeyey , ceel buu sameeyey, isbitaalow dhisay, dugsiyow dhisay oo ficlu khayraad dadka oo dhan u dhexeeya ayuu sameeyey, waqafuu sameeyey masaakiinta ), WALAD wanaagsan ee markuu dhintay ka bacdi u duceya, iyo CILMI lagu manaafacsado(lagu nacfiyo). Sheekhow waxaan rabaa , saddexdaas waxaan ahayn oo aad noogu dareyso

haddey jiraan ama faahfaahin dheeraad ah?

Sheekh Maxamad — Saddexdaas arrimood oo la sheegay waxba kama dhimmana, haddii ay wax ka dhimman yihiin aan haddaba isla eegno.
Soo dhexgal: Mid baa ka dhimman oo aan soo xusuustay. Bil metel waa dhintay ninlii ama shiikha guryo badan buu leeyahay, markaasuu wuxuu yiri: Guryakeygaa, makhsinkaas wax laga ijaaraa ma jiraan oo waa waqaf oo masaakiinta iyo culumadu ha seexato.

Shirguddoomiyaha — Waxaan bal iminkana hadalka u gudbinaynaa Aw Daahir Afqarshe.

Daahir Afqarshe — Anigu waxaan wataa sheeko yaroo aan maqlay oo aan doonayo in markaa shiikhuna uu inoo sii faahfaahiyo. Waxaa jirta, sheeko uu aad uga sheekeeyey Xaaji Maxamad Xaaji Xuseen(Sheekaxariir). Waxa jirta, dadkan ay wada degaane Hawdkakan dega ee dhiblowga ah ee weligii isleeyn jiray ayaa laba reer waxay kala dileen nin. Magtii iyo wixiiyoo aan weli la kala qaadanin, ayaa 12 nin oo dhallinyari ahi waxay ogaadeen oday sirqa ah oo la yiraahdo Dhoonyacad oo wiil yarina uu la socdo oo iska sodcaal ah inuu meesha soo mari doono oo waddaadaa loo joogsadoo odaygii baa la qabtoo dabadeed la yiri waa ku dileynaa. Odaygu nimankan laba iyo tobanka ahi wuxuu u yahay awoowe. Odaygii wuxuu yiri: "odaygan siddeetan jirka ah baan ahay oo awoowaan idiin ahaye maxaad ii dileysaan oo kulligiin waan idin wada garanayaaye miyaad waalan tihiin". Mayee waa ku dileeynaye diyaar garaw baa la yiri. daygii wxuu yiri:" laba ragcadood oo sunno ah baan dukanayaaye ee markaan dukado i dila haddaad rabtaan", afar gabay ahna waaba u sheegay nimankii oo wuxuu yiri: "idinkuna i dila idinna waa i dabageleysaane dan ha looga baxo reer Cilmaa doortay aakhirae".
Gabay yaroo intaaba la eg ayuu tiriyey. Ninkii waa la dilay, kii yaraa ee la socday odayga, milaha reerkii ay rabeen buusan ahayne, lama dilin( asagaa warka keeni doonee, yarkii). Nimankii waa isu soo diyaar garoobeen inay colloobaan, degdeg iyadoo aan waxba loo dilinee ay damceen inay isku shuf beelaan oo isku soo dhowaadeen, yaa ninkii la dilay, oo odayga ahaa, wiil uu dhalay oo Calikabkabe la yiraah, oo sheekooyin badan leh, ayaa haweeneydiisii umushay oo gabar umushay. Laba-saddex dharaarood ka dambow goor habeen ah buu yiri: bal gabadhii i soo tusa. Waa la soo tusay. Intuu majinta qabtay buu dabadeed reerkii oo dhan intii uun gacantiisa gaareysay ka laliyey. Tii yarayd halkaasey ku dhimatay. Naagtiisii buu yiri: anigu gabar ma aqaanne, farasku waa kaa gurxamayee caws u soo gur. Waa nin maqanoo ebtilo ku dhacay. Khasaarihii ugu horreeyey ee uu galay, taasey ahayd, nimankii waa colloobeen oo nin bastii u dhintay mooyee kow iyo tobankii kale asagaa gacantiisa ku dilaa la yiri. Kolkuu kow iyo tobankaas nin dilay baa maalin ay goob xun isdhigeen, ayuu cararayoo qabrigii odayguu tegay oo geeraar ka tiriyey inuu wax u baabi'yey. Aakhirkii dambe ninkii waa dhintay. Waxa la sheegay in xabaashiisii qiiq wax u egi ka bixi jiray oo aan

qarsoonayne waddanka oo dhan laga yaqaanno. Markaa, ducada iyo diinka inuu cajaaib yahay, culumaa la fariisiyey qabrigii dushiisii, quraan badan baa lagu akhriyey, waa la duceeyey. Ilaahay dabkii waa seexiyeyoo haddeer qabrigii ma leh qiiqii ka baxaayey. Sheekh Maxamad wuu sheegay inuu aminkana ogyahay inuu qabriga caadi yahay markii horena qiiq ka bixi jiray oo isaga qudhiisa ayaa arkay. Marka khayraadka la kulmaayo iyo diinka la akhrinayo iyo waxaas oo dhami; bal sheekha ha inoo faahfaahiyo.

Shirguddoomiyaha Waa tahay, Sheekh Maxamad ku soo dhowoow.

Sheekh Maxamad Cibrooyin badan aa jira oo la arkayoo ummadda la tusay. Waxaa jiray oo cayaan loo arkay, Hobyo uu suldaankii Keenadiid ahaa ku dhintay, xukunkuna inuu jawr ahaan jiray, in qabrigii qaylodhaanu ka yeertay ummadda ay wada maqlayso , in culumo la wacay quraamo badan in la akhriyey oo ay qayladhaantii inay degtey. Qayladu dhankaasey naga soo gashay. Anigu ummaddii aragtay kuma jiro. Laakiin ummaddii la maqashiiyey oo dadku isaga marakacayey maqashayaan ka mid ah. Intii maqashay ama aragtay waxay ka soo sheegeen waa iyaga iyo ka Allahood. Adiguba inaad maqashay ayaan u maleynayaa. Dadka inuu sida yahayna, qofkii dadka dhiba oo la habaaro waxaa lagu habaaraa " qabrigaada qaylodhaami ". In la arkay waa suuragal. Wixii sidaas yacni qabrigaada qaylodhaami iyo qabrigaada ma qodmo, qabuur la qodaayo oo abeesooyin ka soo baxeen ama qabuur la qodaayo oo dhagaxii uu jabi waayey. Waxaan qiso ku maqlay, nin suufi ahaa aa naagtiisii nin ka baacsaday. Dadkan suufiyaalka ahi Ilaahay kuma ibtileeyo. Shiikhii waa korbooday suufiga ahaa. Ninkii Ilaahaybaa amar u keenay oo waa bararay bug asagii oo dhammaa. Waxaa la yiri sheekhii:" sheekhow iska duceey, iska cafi xaqaadii yaa qabtaye. Xaqeygii maaha ayuu yiri. Waa jeexjeexmay mugga, bararkii hadduu ka batay. Waa kaasoo dhiiggiiyaa ka socda, iska cafiyaa la yiri. "Cafimaa". Ninkii waxa ka dhacay ruuxii; karfanaa la galshay, godkiiyaa la qodi tegay, godkiyaa qodimi diiday. Xaqaadii qabtaye, annaguna dhibtoonay, sheekhow iska cafi. " xaqaygii ma aha" buu leeyahay oo halkaanuu iska fadhiyaa. Karfantii, bararka inta ka batay ayaa guskii jeexay asuu bug soo yiri. Bahalaa inya soo haaday, samada ka yimid, uu baf siistay. Aaaaa xaqeeygii waa kaa ee mugga duuga ninka ayuu yiri. Saas waa la arkay. Bani aadamka waxyaabo badan uu tilmaamay aa jira.

Shirguddoomiyaha Horta, aad iyo aad baa Shiikh Maxamad iyo raggii odayaasha ahaa ee ka hadlayba ay u taabteen arrimihii aynu doonaynay ee ayadoo sidaas ay tahay, waxaa jira maahmaahyo,waxaa jira ciyaaro, waxaa jira gabayo, arrimahaas oo dhanna soomaalidu isgaarsiinteedu waxa weeye hadal. Hebalow, maxaa la sheegay, war magaalo iyo war miyi, war dareen, war daaq. Sidaasaa hadalka la isku gaarsiin jiray. Waxaa jirtay, haddaynu dib ugu noqonno, Cusmaan Cali Sharmaarke yaa isagoo gurigiisa jooga, saan sheekada ku maqlay, yaa niman soo cayaargudeen baa la yiri. Markaasaa wadaadkii soo baxayoo wuxuu yiri: war-yaaya, Ilaahiin

ka yaaba oo ciyaartan iyo waxan lama oggolee iska daaya. Ninkii orgi-naagoodka ahaa ee heesaaga ahaa yaa dhawaaqayoo wuxuu yiri: "Alif iyo akhrinine, awgayow ubbada xooroo alalaaska soo raac". Kii kalaa u jawaabay oo wuxuu yiri: "Ma billaawe dheerahay baxsi ma u sameysnahay, bogga ma i sarsaran yahay, naarta guuxday gawgeedaan geelayaga uga soo guday". Kii kalaa hadloo wuxuu yiri: "Qaalow wadaadkii qiil yaraan ka haystaa maantii qiyaama aan qalabka inasaarrayn afka waa qar oodan ah, lugahaa qumni u baxa,gacmahaa qarentama".
Intaas markay israaciyeen nimankii orgi-naagoodyada aha oo ninba wax ku hadlay yaa wadaadkiina gabay isla taagay, wuxuu yiri:

Allahu akbar hadalkayga waa ku abda'ayaaye
Udgoonow rasuulkii salli baan u akhrinayaaye
Aalkiisa nuurka leh salaad waa u akidayaaye
midib layswato yaa tahay oy dheguhu owdmeene
bal i maqal waxaan kuu akhriyi waa kitaab idile
ilma adeeradaa iyo tolkaa ehelxigaalkaa
ubadaad dhash iyo waalidkaa, ooryo kula jooga
intaasoo ku soo agafadhida kuna aqooneysa
nafta haddii lagu asiiboo taahdo
aad wax badan alaladdoo taahdo
nafta haddii lagaa oofsadoo aakhiru hoyato
amaraad ku diidayo ma jiro oradaad roortaaye
haddii iilka lagu seexiyoo lagugu oodeeyo
iminkay wax kuu iman labaa Eebbe soo diriye
indhahooda lama eegi karo sey u abuurmeene
onkadkana ka yeer weyn markey eray yiraahdaane
waxaad ku argagixi hadalka sey u adadkeeyaane
haddaad ehelu-khayr tahay xaqaad ku akideysaaye
jannadey albaab kaaga furi udubyadeediiye
aashaa u seexeey ku oran aamin baad tahaye
haddii kale bir bay arjumi ololka naareede
istibaax feeruhuba waa is-aga maraayaane
shamsaad kulkeeda arki baa imanaysa meel dhowe
miisaaan xaq loo oodayoo aaminaa jiree
waa midaan wax lagu iibsado iyo eexasho aqoone.

Halkaas buu la maray gabaygaas. Macnaha waxaan uga danleeyahay,markaynu eegno asaleynka ama aynu eegno dhaqanka, waxna waa sheeko la isku soo wariyey,waxna asaleynkaaba inoo sheegaya. Marka, markeynu sheekooyinka aynu eegno la isu soo tebiyo waa ay fara badan yihiin, waana fiican yihiinoo waa dhaqan.
Ulajeeddadaas oo dhammi waxa weeye laba qodob. Midu waxa weeye, bal horta waxaa la yiri: nin baa intuu wiil lahaa yaa naftii qabatay odaygii; markaasuu wiilkii yiri" aabbe maxaad igula dardarmi lahayd?". Odaygii baa wuxuu yiri: " waxaan kugu la dardaarmayaa, meeshaad joogtaba Ilaahay ka baq; nin ku aaminayna ha khayaanin "iwm. Markaas arrimihii ninkii waa wada jarribay waana u aayay. Macnaha waxaan ka wadaa, sheekooyinka

la isu soo tebiyo ulajeedadu waa laba: midu horta waa Ilaahaa ka baq oo markakan la leeyahay " xabaal baa qiiqday ", " xabaal baa masas ka soo bexeen ", " xabaal baa quraansho ka soo baxday " , " xabaashii baa qodmi weyday " oo intaas oo dhan la isku habaaro oo lagu sheekeeyo. Misna ulajeedadu waxa weeye.war Ilaah ha laga baqo oo waa cabsi la cabsigelinaayo dadka oo la leeyahay hebel xabaashiisu hadday qodmi weydo wixii uu sameeyey baa fara badnaayoo saasey xabaashu u qodmiweyday. Hadday meeshu quraanjo iyo dhuuracaso ka soo baxaan, wixii uu geystay baa farabadnaa oo saasaa bahalahaan uga soo baxeen. Marka arrimaha caynkaas ahi waxa weeye geesigelin lagu geesigelinaayo oo dadka la leeyahay wax xun ha kasbanina. Marka waa inay ka dhaqaaqaan. Marka waxaaba laga yaabaa inaaba laba arkine, hase ahaatee loola jeedo nin waliba wuxuu kasbado, if iyo aakhiro ayuu heli doonaa. Bil metel, sheekh Aw Daahir baa yaqaanee, wadaad ina Holan ahaa ee aniga adeer ii ahaa Xaaji Jimcaale yaa wax badan xajiyey, nin shiikh ahina waa ahaa, aniga ma joogin markuu dhintay, laakiin waxa la yiri: godkiisa marka la qodaba biyo uun baa ka soo booda oo waa la qodaa biyaa ka soo booda. Markaasaa la yiri waa ahalu-khayre biyihiisa dhexseexiya marka. Marka qasdiga ugu weyn ee meesha ku jiraa iyo sheekooyinkan waxa weeye qofka wuxuu kasbado ayuu aakhirana ka helaayaa. Miduna waa sheeko kale oo waa kuwa aanu hadda shiikha su'aaleynay oo bil metel qofka marka uu dhinto waa tan taqliinta la sameeyaa oo la yiraahdo: Ilaahaagu waa kee? Diintaadu waa tee? yaa kuu imaan doona? Kitaabkaagu waa kuma? Markaas marka saas la leeyahay, marka la leeyahay caashaan diintaadu waa tuma, dee waa diinta maxamadiga oo waa Islaamkii. Marka lama oranin shiikh, oo caashaan anigu masalooyinka aan diido waxa ka mid ah, inkasta oo aan ku kaaftoomay sheekha waxa uu na yiri, waxay culumada oran jireen, ninkii aan sheekh lahayn. Shiikhii waxaanu u turjumanay mid soke illeyn waa shiikh shishe. Arrimaha noocaas mooji sidey wax yihiin, Siyaaraduna waa jirtaa oo dadku waxaaba yiraahdaan, siduu Xasan u sheegaayey, ururka la isugu yimaaddo ama kulanka la isugu yimaado ama siyaarada wax la siyaarto ama Allabariga, horta guud ahaan waxaa la yiraahdaa ALLABARI oo waa Ilaah tuug. Ama qoys ha ahaado ama jamac ballaaran ha ahaado ama jilib reer ha ahaado, bil matel meeshan halka laga yiraahdo reer hebel baa kulan qaba oo laga soo shaqeeyo oo caanaha la sii-dhigo oo mesaggada la sii-dhigo oo galleyda la sii-dhigo oo xoolaha la isaga keydiyo oo maalin la isla ogyahay markaas kulankaas la isugu yimaado, waa yoom-farax ay wataan ayagu. Anigu arrin noocaas ah waa ka qaybgalay. Markaasaa marka la dhergo baa la yiraahdaa nin walowba xubintaada sheego oo la yiraah " yaa reer hebel ka jooga ". Waa kulan laakiin waa kulan qoys. Bil matel beel baa meel wada taalla, markaasaa la yiri aan tacdaaranno oo aan tacdaar sameysanno. Caano la biirin jiray oo DHIIL-QURAAN iyo DHITOba la yiraahdo oo caashaan nabad iyo caaniyo dhowrto lagu naaneyso. Geelana waxaa laga sameeyaa wax IBDAR la yiraahdo, arigana irriddaa loo sura oo waxa la yiraah DHIIL-QURAAN, markaasaa caano lagu biiriyaa.

Socoto haddayan imaanin caanahaa tacraartaasey ka qaybgelayaan in kastaba halla ekaadeene. Caanaha kan IBDARKA la yiraahdana, geela markuu la magaabo yaa HARUUB la soo qaadaa oo xaw xaw yaa laga siiyaa, afar shan jeer marka lagu dhiijiyo haruubkaa yaa haruub kaloo halka yaal lagu shubaa. IBDAR baa la yiraah markaa, waxaana la siiyaa qoysaska saboolka ah ee markaa uusan geel u irmaanayn. Taasina SADAQADA bay ka mid tahay. Waxaa la yiri roob baa inoo di'i waayey jirraa arliga soo gashay, colaad baa la sheegayaa, tuugo fara badan baa timid, dhulkan waanu u soo guurnoo waa dhul nicmo badan, laakiin DHOOWR baa jirta, dhawrtaasoo libaax lehoo, shabeel lehoo, tuugo lehoo, col lehoo, xanuunna waa lagu sheegayoo ganeecaa meesha ku badan, tacdaar inoo dhigaa la yiraahdaa. Beesha halkaa deggan ee keydsan jirta caanihii dhiil-quraanka ahaa yaa isugu imaanaya maalin. Maalintaasaa la yiraahdaa waa tacraar(tacdaad), xoolihii baa lagu qalaa, caanihii baa la bixiyaa, culumadii baa meel la fariisiyaa, quraankaa la akhriyaa oo waxa la yiraah tacdaar(tacdaad). Waa beeshii meel isla degganayd oo aan kala soocnayn oo balaayo ka durraamanaya. Markaas waxa laga duceysanayaa wax shar ah oo dhan. Tan kale ee la yiraahdo SIYAARADA, siyaaro marka la yiraahdo waa af-carabi oo hebelaan soo siyaaranayaa waa hebelaan soo booqanayaa oo buka bil matel.

| | |
|---|---|
| Shirguddoomiyaha | Mawduucu sidaasuu ahaa laga hadlaayey. Inta aadan idinku u gudbin, aniga ayaa waxaan qabaa su'aalo, mase waa kuu dhiibaa? |
| Ka-qaybgale aan magaciisa la sheegin | Mawduuca si fiican baan u kasay, laba dhinac ayuu leeyahay. Dhinac waxaa Diinta Islaamku maxay ka qabtaa labadaas mawduuc. Dhinaca kale waxaa weeye dhaqanka soomaali ee soo jireenka ahaa, muxuu Diinta ka waafaqasan yahay muxuuse ka waafaqsanayn ayadoo labaduba yihiin waxa aanu annagu leenahay ummad ahaan iyo taariikh ahaan intaba. Marka, mar ahaadii Xaaji Maxamad Liibaan uu ka hadlayay mawduucaan xagga Diinta waa siduu u yiri. Hadalkoo la soo uruuriyey ama khulaasadu waxay tahay, SIYAARADU mar haddii sidii leesu faray oo Diintu ay fartay hadday ku socoto way bannaan tahay. Kaas waa shardi xiran. Haddii shardigaas la waayo waxbaa imaanaaya. Nabigu caleeyhi salaam wuxuu yiri: " Waxaan idinka reebay hadda ka hor inaad qubuurta siyaarataan, laakiin hadda wixii ka dambeeya siyaarta ". Macnaha markii hore la isga reebay waxa weeye, dadka Diinta kuma negaanin oo diinta kuma adkeysanin. Marka amey caabudaan oo taqaaliidkii hore iyo waxyaalo hore u dhacay ayuu uga reebay. Markii dambe ee uu Islaamku Diinta ku negaaday oo diintii la bartayna wuxuu yiri siyaarta qubuurta. Markii, siyaaradu ay habkeedii tahay waa bannaan tahay. Marka ugu horreysa waxa waaye in la xusuusto qof walba inuu dhimanaayo kow, tan labaad waxa waaye in loo duceeyo qofka dhintay oo qabriga ku jira. Taasoo ah inaad ahlu qubuurka inta salaanto weliba aad u duceyso oo Ilaahay raxmad aad uga barido iyo naxariis weeye xikmadda ku jirta siyaarada qubuurta. Laakiin, sida |

Xaajiguba inoo sheegay adiga(qofka siyaaranaya) nafci-doon ma tihid. Nafci, khayr iyo shar, sida xaajigu ku celceliyey, Ilaahay baa iska leh(awood) oo wax la wadaagaahu ma jiro. Mawduucan asaga ah waa xasaasi, dood badanaa ka taagnayd kana taagan, kana taagnaan doonta. Asaga kaliya ma aha oo waxyaabo badan baa jira oo dooddu ka taagan tahayaa jira, waayo Xadiisaa jira, Aayad Quraanaa jirta oo ninba si' buu u fahmay. Matelan: Masar waxaan isaga mid nahay siyaarada qubuurta oo annageey nagu caado yihiin. Qolooyinkaan jooga Xijaas si kale waaye dhaqankooda xagga qubuurta iyo siyaarada. Qolooyinkaan shiicada ah waa si kale oo ka duwan oo dadka culumadooda ah si bey u siyaartaan. Siyaaradan mawduuceedu aad ayuu u ballaaaran yahay waa haddii guud ahaan Islaan la yiraahdo. Haddaan u soo degno annaga Soomaaliya: haddaan ku soo celiyo, SIYAARADA, sida Xaajigu u sheegay, waa ay bannaan tahay oo sharcigu waa sugay. Khulaasada hadalka waa in lays faray siyaarada qubuurta oo ay bannaan tahay shardiga ku xiran waa inaan la dhaafin xadkii la isku oggolaa. Waa inaad dhimanayso inaad ogaato oo dadkii kaa hormaray aad ku cibro qaadato. tan xigta waa inaad ahlu-qubuurka u duceyso. Taas waa tan Diinta ay na farayso. Tan kaleeto oo annagu aanu qabno, waxyaabo badan oo aan ku dardarnaa jira oo laba waxyaababa waa jiraan: Waa midoo dadka Diinta ma wada yaqaan oo dadkaan aqoonaa badan, siyaaradana waa la aadaa. Su'aalaha aan xaajiga u soo jeedin doono waxaa ka mid ah matalan: Hadday dhacdo in laba jinsi isugu yimaadaan meesha oo niman iyo naago ay isgu yimaadaan siyaaradii iyo guud ahaan siyaarada oo iku darankaas iyo qabriyada wax lagu xirxiro iyo waxyaalkaas oo dhan, Xaajiga inuu dib ugu noqdo waan jeclaanlahaa. Middaan kaleeto, guud ahaan meytakaasha, meeytada oo loo duceeyo oo wax loo bixiyo waa caado dhanqan gaboobay oo gaamurtay aanu leenahay, dadnimadeyna ka mid ah oo haddii wax kastaa dhacaanna, ama Diin ha waafaqsanaato ama yeesan waafaqsanaanin waxay ka mid tahay caadadeyna oo dhaqankeenna ayey ka mid tahay waa jirtay waana jiri doontaa. Caadooyinkaas, mid Diinta waafaqasan iyo midaan waafaqsanaynba waa leenahay. Haddii miisaal yar aan keeno: miraayad haddaan isku fiiriyo ee aan wajigeyga Cali ah aan arko ee uu ila foolxumaado inaan diido ma aha. Macnaha waxaa ka dhigan, waxaan annagu leenahay oo soomaali ahaa aan u leenahay, ama diin ha ahaato amba yeey ahaanin, dhaqankeyna ka tirsan, wax kasta ha ahaatee( qabaailka la isku diriro iyo waxyaalka xunxun oo badawnimadu iyo jaahilnimadu ay keentay) ma aha inaan ka gugubanno oo aan diidno ama ka dagaallano ma aha. Waxaa habboon in kiisa xunna inaan ka gubayno inaan isku tilmaanno, kiisa fiicanna inaanu hormarinno weeye. Laakinn ma lihi iyo inaan inkirno iyo inaan derbiyada madaxa la dhacno macnaheedu waxa weeye, adoo miraayad isku fiiriyey oo is-inkiray. Waxay ka dhigan tahay, buug ummad badanoo soomali ahi maskaxdoodu ku soo kharibantay ayaa bandig yiillay waa la arkay. Markaasaa waxa la yiri: qabiil baa ka soo baxay, iga duwa oo iga fogeeya . War ama halla fogeeyo ama yaan la fogeynine horta yaa leh?. Waxaad

lahayd ma yahay mase ma aha. Macnaha waxa weeye waxaynu lahayn waanu lahayn. Dhaqankaas kiisa xun waaba ka gudbi doonna kiisa fiicanna waa inaynu kobcinno.
Haddaan ku soo noqdo sua'alaha aan mar labaad ku soo celinaayo waxa weeye oo aad ka qaybgeli doontaan, sidey u jirtay ama wax ahaayeen ayaan u sheegaynaa. Wixii Islaamka waafaqsan iyo wixii aan waafaqsanayn waa kala qaadeynaa. Laakiin waxaynu leenahay ama diin ha ku qotomaan ama yeysan qotonsanaanine oo aan annaga Dhaqankeenna ka mid ah aan seey yihiin u sheegno oo aan ummadda u kaydinno.

Shirguddoomiyaha Haddana Faqi Buraale ayaan ku wareejinayaa.

Faqi Buraale Waa tahay. Inkasta oo barnaamijka uu iga horreyey oo aanan la wada socon ulajeeddadiisa iyo mawduuciisii, misna waxbaa iiga baaxay. Hase ahaatee ayadoo saas ay tahay ayaan waxaan jeclahay inaan dhowr su'aalood Sheekha weydiiyo ee dhaqankeenna ku dhexjira dadka qaarkiisna ay isku rumeysan yihiin dadna inuu ku diido. Bilmatal marka qof dhinto rag iyo haweenba waa ka qaybgalaan aaska. Haweenka biyey keenaan way socdaan, way isa soo tuuraan, waxse ma aasaan ee waxa wax aasaa waa raggii. Dadkaas waxay yiraahdaan hebel baa dhintay ee aanu ka wada qaybgalno rag iyo haweenba lagumana ceebeeyo. Islaamka halka inala deggan oo ay carabtu ka mid tahay iyagu waxay u oggol yihiin raggoo qur ah ee in haween ay ka soo qaybgalaan ma oggola. Taasu waa mid oo waxaan jeclaan lahaa in sheekhu uu inoo taa-taabto inay sharciga waafaqsan tahay iyo inay ka soo horjeeddo oo uu inoo micneeyo. Waxaa kaloo jira oo aynu la kulannay, culumada qaarkeed baa waxay yiraahdaan haddii aadan shiikh lahayn naagtuba kuguma xiranto oo waa inaad jaaso qaadataa. Taas ruuxeeda bal inuu wax nooga iftiimiyo shiikhu yaan jeclaan lahaa.

Sheekh Maxamed Buraalow, hadallada aad sheegeyso nin waddanka joogaahu waa ogyahay wixii jira. Ninkaan shiikh lahayn shaydaanaa u shiikh ah Kitaabkaaba qaba. Naagta kuma xirantada la leeyahay, ninkaan shiikh lahayn kuma xiranto maaha oo niman shiikh lahayn oo naagu ku xirantaa waa jiraa oo shanta salaadooduu dukadaa. Ninka la dabataagan yahay waa ninkaan shanta salaadood dukeynin oo Diinul Islaamba madaxa ka gooyey, naag laguma xiri karo waaye war meeha jiraa. Isla markaas, axkaamtu waxay leedahay " laruurada waxay bannaydaa shaygii la xaaraan yeelay; mashaqo ama dhib hadduu ku qabtana wuxuu soo jiidaa fudeyd (teysiir)". Matal, qofkii waa bukaday, dhiigna wuxuu ahaa xaaraan in cabo, kaadina waxay ahayd in la cabaa xaaraan. Kaadidii waxa la yiri, haddii qofku uu buco oo uu coloosha ka qabo cudurka uurweynaadka, daawey u noqotaa oo kaadi geel baa la cabsiiyaa. Dad coloolaha ka buka oo Nabiga loo geeyey ee uu yiyi " geela geeya oo kaadidiisa cabsiiya" Xadiith ah aa jira oo la helaayaa. Shaygii xaaraanta ahaa laruuraa bannayday. Ninkii takhtarka ahaay naagtii waa ka ajnabi, laakiin ilmihii baa ku xumaaday oo ku

qalloocday, cilmigu wuxuu ku leeyahay ilmahaas iyo nafta inuu koriyo. Takhtarkii naftii inuu koriyaa(badbaadiyo) aa la amray. Waxaa jira nin takhtar ah oo naagtii walaalkii oo dumaashidi ah saddex goor ilmo ku soo qalay. Takhtarkaas waa ku dambawday lama dhihin, maxaa yeelay nafuu korinaya(badbaadinayaa). Dhibka ama mashaqadana fudeedey soo jiiddaa. matalan. naag ajnabi ah inaad adigu taabato waa kaa xaaraan, laakiin ayada oo meel taal oo bisteed ah aad aragtay, ma sidii Ilaah kaaga reebay bay ajnabi kaaga tahay mase waajibaa ku fuuloo qofka inya soo toosido oo matagga ka meyrtid oo biyo ku qabatid oo saas u qaaddo yaa meel geeyheesaa? Waa inad meel gelisaa ama geysaa. Maxaa yimid meesha? Sheygii awal lagu saaray shey ka weynoo ka culus ayaa yimid. Aan u noqdo naagta kuguma xiranto la leeyahay. Ummadda cirqigeedii meeshow ka beermaayey waa laba qofood oo la isku nikaaxiyaa oo nikaax dhaco. Halkaas ummaddii baa ka beermeysa. Haddii la yiraahdo: shanta salaadood niman dukanin naag lagu xirimaayo, guska waa u kacsan yahay, naagtuna waa qooqan tahay, haddii lagu xiridiid waa boodaa hadduu yiraahdo oo sida dameer u boodo, meeshii waxaa ka imaahaaya fuxshigii fuxshi ka weyn. waa in naagtii ninka lagu xiraa. Dadkakan cawaanta ahi waxay dhihi jireen:" masoome masalaade, iidmadukadaa ka liita". Ciiddan la isugu yimaad oo shacaairul islaamka ah oo labada ciidood ah, anigu waxaan soo gaaray, dadka aan aadi karin oo xoolaha looga tago, naaguhu ayagoo kuushaan ay qaataan inya dhiibta yiraahda:" iidda ha lay geeyo kuusha"oo mihii lagu iidesaayey dadka aadaayeey u dhiibeysaa, meeshaasaa la isugu tegahayaa. Naagtii kuusha dhiibatay, muggii loo keeno galabtii, saddex goorey saas madaxa ugu wareejin jirtay, mugga saddexaad inya wareejiso ay dhunkooto ay luqunta gasheydaa. Maxay ka dhunkoohaydaa? Kulanka khayraad kuushaas ay tagtay yacni la geeyey oo ictiqaadkaas ay qabtaa. Ayagu ma yaqaanniin wax kale. Dadku carabi ma yaqaaniin laakiin luqad soomaali aa loo laqinaa oo meeshii: "Allaahu akbar, Allaahu akbar, Allaahu akbar" laga dhihi jiray waxay dhihi jireen:

Meelaan garooy laga lahayn
meelaan giir laga liseeyn
meelaan geel laga rarayn
eey naftu u geeddi tahay.

Taas, luqo ay yaqaannaan weeye oo aakhiro garoy lagama laha, giir lo'aadna laga lisi maa, geelna laga raramaayo, naftuna waa u geeddi. Mugguu xusuusto meeshaas inuu u socdo yaa dadkii oo dhan isku daadanaayaa oo ooyayaa. Meeshii Allaahu akbartii TAKBIIRTA ahayd oo la qaadaayey, illeyn ma karaane, waxaa ugu jirta: meelaan garoy.....sida kor ku xusan. Qubuuraha haddaan u soo noqdo. Cidaa beriga guri degeysa. XAWAALO iyo XAWAALO-MADOW ay ugu qaybsan yihiin xabaasha. XAWAALO daaraa ka dhisan, oodaa ku wareegsan. Maxaa la gartay? waxaa la gartay in dadkii faraciisii ahaa dhaqan yahay. XAWAALO-MADOW, qoryihii berigii hore lagu aasay ayagoo dhar la'a ay qabriga reeddiisa

daadsan yihiin oo ood ka dambeysaa kuma taal, daaruna kama taal. Xawaalo-madowaa la yiraah oo meeshaa inaan farac jooginaa ka muuqata. Markaasaa waxaa la yiraahdaa: ciddi waxay agdegtay xawaalomadoobe saddaqo halla keeno, markaasaa inya la tago oo la oodo aa sadaqadaas la baxaa. Maxaa la xusuusanayaa oo dadkaas xawaalomadowga oo dadkaas xawaalo madawga uu ku yaqaannaa inaan farac ka harin. Maxay u geynayaan? waa Ilaahow sidaas oo kale ha naga dhiginoo xawaalomadawgaas Rabbiyow ha naga dhigin ee farac naga reeboo faracanagu uusan go'in sida dadkaas. Kaas waa ictiqaad dadka uu isku raacsan yahayoo haddii aad aragto qoryo xawaalo ahoo madow oo kaligood meel yaal oo daar calaamo ahna ku aalin oodna ayan ku aallin, markii la duugay intiikaddibkeedii ahna aan lagu soo noqon, waxaa kuu muuqanayaa in faracaas inuu go'ay oo cilmi kaa maqnaa oo aad heshay. Curfiguna waa kaas dadka uu dhaqamaa. Xawaalladan la tegaayo, waxaa meeshaa ka muuqata: "qabrigaada oo aan la siyaaran, qibladoon laguu jeedin iyo qabnadaadoo lagu diriro, saddexda wiil la'aanaa leh" maahmaahyadii ahayd. Nimaan farac ka herin , qabrigiisa la siyaaran maayo, qibladana loo jeedimaayoo lagu dadaali maayo oo si' fiican meedka halloo toosiyo lama leh ee nin neefka la qalay hilbo ka raba oo yimid aa iska kaa aasaaya, qabnadaadana waa lagu dirirahayaahoo oo waxaa la leeyahay yaa iga xiga yacni wiil ma dhalin, walaalse kama tegine. Ayaduna waa saasoo, dadka kan aad arkayso oo xawaalaha siyaaranaya faracaas waa duceysi. Siyaaradan laguu sheegahaya waa duceysi lagu duceysanayo Rabbiyow faraceyna ha gaabin oo noo badi. Xayaatadaan dunyaawiyada ah inay ku noolaadaan ay rabaan. Sababta ay ugu noolaahayaanna ummaddaas isu timid oo muslinka ah meel ay wax ku siin karaan oo oy imaa karaan dadkii wax la siihaayey( gobaa socota, culumaa socota, marti yaa socota, dad masaakiin ah ayaa socota oo intii wax la tari jiray yaa meeshaa ku soo tiigeeysa. Tiigashadaas ay ku soo tiiganayaan meel ijtimaac ahoo isu yimaadiin ee qof la arkaaba muraadka ay lahayd ama rabto inay ku sheegato oo muraadkaas haddii la siiyana ay duceyso waaye ijtimaacaan xawaallada laysugu imaahaayaa. Halkaas ummadda isugu imaanayso oo ku duceysanayso waa meel la milicsadaa, taasaana looga jeedaa siyaarada. Isla markaana waxay caado ka dhigteen inay ninka mehaas uga maqnaada inay habaaraan oo ay habaarkana la helaan. Qolada geedka ay fariisan jirtay iyo golaha ay degi jirtay nagu merida , geedka iyo golaha ha meriyeen bay yiraaheen. Ballankii lagu ballantamay aa wuxuu ahaa ijtimaacaas inaanan ku kala maqnaanoo aan sadaqada isku daranno oo masaakiinta aan wax wada siinno oo martida aayan na kaliyeeysan. Ballankaas nimankii ka baaqda oo dadkii ku ballan furay, si aan jariimo u gaarin lama arko. Waxaana la rabaa in ictiqaadka ummadda ay lahayd aadan u beddelinoo aadan wax xun ka maleyn.  Haddana xarig xawaalada lagu xiro oo NIRGO la moodahayo oo nin nirgo QOOLKOOD ku xirto oo nin MAREEG waxarood ku xirto oo nin wiil rabaa uu durrufkii wiilka loogu xiri jiray dhexda ku xirto oo nin naag rabaa uu inya cad GAMBO ah soo qaato oo godka meel inta uga laalaadiyo ku xirto, caadadaas

adduunka waa la wada jiray laakiin caado sii-ba'ayso waaye oo mugga haatan baadiyo haddaad aaddo laguma arko xawaalada oo waa ka go'een. Waxaa jiri jiray xawaallo DAR laga suubiyaa oo afar qoray loo mudaa oo geed la soo qorayoo QABAAL ah inya korka laga saaro, geeley nimnkaasu rabaan oo ay u Allabayayaan, darkii yaa saaran oo mahey ku shiraan asaa waxaa la leeyahay Ilaahow geel na sii. Waa arki jirnay, hadda laguma arko xawaallada oo waa baaliyowday. Ninbaa waxaa la yiri: ninyohow, gabadhaad guursatay sey tahay? Wuxuu yiri: anigu gabadhii waxyaabaan ku arkay, ilmaha waa la dheyele laakiin muggii aniga ay i aragto oo ay araggeyga u jeeddo ay ka soo kacdaa inay ayagoo dhan iska deyn doontaa u maleynayaa haddayba araggeyga uga soo kaceyso, gogosha waa duuban tahay, ma dhigto laakiin gacanta haddaan ku taago amaan afka ka hadlo sidii wax dhignaa ayeey haddiiba la soo dadaashaa, guriga inya gasho wax ima siiso, haddaan saas iraah oo aan gacanta dhaqaajiyo horey ka kacdaa asey wax keentaa inay ayadu garan doontaan u maleynayaa. Xasan, dadku caadadii xumeedoo shaniicada ahayd waa uu ka sii-socdaahoo mid fiican uu u sii-socdaa oo wixii la faro oo la yiraah waxaas waxaasaa ka fiican hadduu hore ka qaadaayo uusan jaxdi u soo jeeseynin wixii fiicnaay ayuu mugga u socdaa dadku, caadadaanna wax la wadajiray muggii hore waa ay tahay.

| | |
|---|---|
| Ka-qaybgale aan magaciisa sheegin | Waxaa weeye, shiikh Maxamad weli kaama harin ee adna wax sii-diyaargareyso. Waxaynu wada xusuusan nahay ama aynu isku wada raacsan nahay BOOLIGU inuu xaaraan yahay. markaas waxaa jira, gurigaaga waxaa jooga gabdho fara, badan bil matel. Gabdhihii, aniga kuuma imanoo kuma oran i sii oo ma aadan ii diidin; gabadhiina cashaan masuulkeeda ama aabbaheedaa ah ama walaalkeedaa ah ama ninkii gacanta ku hayey baa ah. Waan soo oraday gabadhaadii baan la cararay, waxaa la yiri masaafo gee meel hebla ah. Adigii iima aadan diidin oo nin ii diiday ma jiro. Wadaad meel joogaan u geeyayoo waxaan oranayaa gabadhatan aan wataaye ii meheri. Markaas gabadhiina caashaan waxay ka mid tahay mulkigaagii, sideebay tahay arrintaasu? Waxaan anigu qabaa wax dhacay inay yihiin oo qof laga dhacay oo aan raalli laga ahayn. Shiikhow, bal arrintaas wax nooga iftiini ma booliyaa mase waa xalaal?. |
| Ka-qaybgale kale | Sua'asha aan anigana dabadhigto. Xaajiyow, sidee loo heshiisiinayaa suaashaas iyo ficilkaanu fameeyno oo ah " ku guursada (haweenka) idinka eheladooda" iyo " Naagta lama mehrin karo weli la'aan iyo laba markhaati caadiliin ah" iyo Xadiithka ah "naagtii weli la'aan la guursadaa waa jaaniyad". Haddaba Axaadiistaan iyo Aayaddaas Quraan iyo masaafadatan oo annagu aanu iska-sameysanay ; seeba loo heshiisiinayaa iyo midda aanu annagu sameyno(dhaqanka)? |
| Xaaji Maxamad | Hadalkaas Cali sheegay suaashiisu, goobtaan aan joogno kaliya ma taallo, dhibkiisuna meel kaliya ma yaallo. Xoolihii gabdhaha laga qaadaayey waa la isku haystaa, gabdhihii nikaaxooda waa la |

isku haystaa, masaafadii la marinayey waa la isku haystaa. Isla markaas, meeshii waxa u adkaadayse waa dulacdan, se waa dulacdanka dadweyne. Haddii la yiraahdo, naag la nikaaxiyey wixii aan ka dhalan waa wacallo, caalamka inta noo joogtaa wacalley u badee. Nin la tuugayow tali, buu yiri, reerkaagana u turo anigana ii tagaabeey. Nin la arkaaba waxaa ku jirta, meeshaad wacal noqon lahayd hadalkaas ha isku nuuxnuuxin. Gabar baa nin u dhiibay ubbo oo wuxuu yiri: soo istajoo, ayadoon istajooney la soo noqotay. Wuxuu èyiri: waxaa jira oo aad la soo istejoon weydey. Gabadhii waxay tiri: ninyahow wadaad ahi, farjigaada waxaad kala baqday aniguna farahayga waa kala baqay. Adigu sow kala baqin farjigaada inaad meeshatan kaadida soo mareyso inaad geliso? aniguna farahayga inaan ku dhaqo waa kala baqay. Haddaad maha wax ka tareydo wax ka tar haddii aadan ka tareyninna aan kala tagno. Nin la arkaaba meeshaas waa ka baqay, ummaddina waxayhaatan ka hor ku dhaqatay waxay noqdeen wax tira badan. Isla markaas, Kitaab aan wax xun ku arkay anigu oo maslowbi? la yiraah oo aan arrada u badnayn. Maalka gabdhaha laga qaadanayaa ma xalaalbaa mase waa xaaraan? Asalkiisuse maxuu ka yimid? kitaabkaas wuxuu yiri: culumada qaar waxay isku raaceen, maalkaas asalkiisu inuu xaaraan yahay. Siyaado mutasila ah waxaa la yiraahdaa neefkii oo weyd ah cayilka uu cayilay; mufasilana waxaa la yiraahdaa wixii ka go'ay oo walad ahaa ee uu dhalay. Isla markaas yow farac meel ah ow haddana mesalo ka dhigay , "farcun" ow yiri. Faracaasaa wuxuu qabaa, maalka gabdhaha laga qaadanayaa ma xalaalbaa mase waa xaaraan ? maxaase lagu magacaabaa? Wuxuu yiri: soomaalida isimkeeda waxay ku magacaabaan " YARAD " laakiin haddii ninka maalkaas bixiya inuu ninka qaadanaya hansiiyo uu u baxsho kan kalana sidaas u qaato waa xalaal. markaas, mutasila iyo mufasila labaduba waxay xalaal u yihiin ninkaas qaatay. Maslowbi kitaabkaas la yiraah yaa qaba masaladaas, kuma dhaqanno oo wuxuu ku xisaabtamayaa, geeli gabadha la iiga qaatay ayaantii dhexdaas ahayd intaasuu ku joogaa. Buulkiisii asagoo jiroo, gabadhiina u wiilalayhaydo una gabdheyhaydo, uu geelii tirsaa asuu leeyahay: intaasoo intaas ah yaa geelaasu tirsi yahay. Biimaalka waxay yiraahdeen Daarandoolle annagaa ka roon oo ceebtaayna Allaha asturo ay dhahaan. Ceeb hadday kaa baxdo xaggey ka asturmeysaa? annaga ceeb Ilaahay ma noo yeelo aan dhahnaa. Nimanka aan geelaas qaadan oo gabdhahooda ama guf ka qaata amase yiraahda gurigii aad gasho Allaha kuu barakeeyo ayaa naga fiican. Nimanka geelaas qaataa, gabdhahoodu, gabadha kontankeeda haddaan la keenin biximaayaan. Kolba waxaan leeyahay, gabadhii masaafadeedii, doonisteedii nikaaxeedii iyo weli-kala-cararkii looma aad-yareysan laakiin waxaad u qabtaa inay dadkii naagta inuu masaafeesto inuu shareeceestay, haddow shareeceestay intii horreysana waxay ayagu xalaaleesteen si' looga gooyo waa dhib leedahay. Waxa ka dhashay waa wacal haddii la yiraana, adigaba habartaa hebla hebelaa la yiraahdaa hebelaa ku dhalay saasaad ahayd ayaa lagu leeyahay oo mashaakil ayaa ka dhalanaya.

Shirguddoomiyaha Shiikh Maxamad waad mahadsan tahay sida aad noogu balballaarisay arrimahaa aanu ku weydiinay oo xag dhaqan, xag caado iyo xag diineed waafaqsan. Bal iminkana waxaan warka siinayaa Salaad.

Salaad Mahadsanid Buraalow. Anigu shiikha waxaan suaalayaa saddex waxyaalood oo yar-yar oo xagga Diinta ah. marka hore waxaan shiikha suaalayaa: b) siyaaradaan Sheekh Awees iyo Sheekh Cali Maye iwm oo jidka dheer loo aadahayo oo dad aan wax haysanini isku kallifahayo, taas ma xalaalbaa mase waa xaaraan?
t) niman waxaa jira shiikhyaal ah oo Quraan iyo Xadiiska akhrinaya, suuqaaneey maro dhiganayaan, lacag baa loogu gurahayaa oo wuxuu leeyahay sheekh fulaan fulaan, Nabiguu sheegahayaa. Lacagtaas la siinayo ma xalaal baa, ma xaaraanbaa?
j) Waxaa jira nin shiikh ah oo shiikh la leeyahay, maalintii dadkuu tuugsanahayaa, habeenkii oo dhanna qubuurtuu dul meerahayaa( ha yaqaanno ama yuusan aqoonine). Maxaa xukunkiisu yahay?

Sheekh Maxamad Salaadow, hadallaad i suaaleyso ha i suaalin. Weli la siyaartay waa weli, Ilaahey iyaa jeclaaday. Ictiqaadka ninkaanu u qabo inuu weliyullaahi yahay isaguna haddu siyaarto inuu karaamo ka gaaraayo uu qabaa, nas u diidaayana ma jiro. Sheekh Aweesaa la aadaa, Sheekh Cali Mayaa la aadaa, Sheekh Sacad Daauudaa la aadaa, Sheekh Xuseen Binu Malkaayaa la aadaa, Sheekh Xasan Kalweenaa la aadaa. Shiikh aan la aadin oo karaama lehu ma jiro, waxa loo aadaayana waa tabarruc. Siyaarada ay aadayaan oo ay muslimiintaas mu'miniintaas aadayaan inay ajirna ka helaan, dembi dhaafna ka helaan oo Ilaahay u dembi-dhaafo ayey doonayaa. Niyadaas Ilaahay iyo addoonkiisa ka dhexeysa nin waa faasid dhihi karaahu ma jiro, Ilaahay afkeyga ka keeni maayo ee xaggaas iga dhig.
Ninka kani aad leedahay oo marow weranayaa waa nin si' kale ee wax ku helo waayey , marana dhigtay oo Ilaahay addoomankiisaas baryaaya. Ninkaa aad leedahay, dadkana waa baryaa, qabriyadana waa aadayaa; haddii uu cawo gashaow qabri tagaayo oo uu dushiisa wax ku soo akhrinaayo, asagasu uu uhbo dhella oo ummadda warsanayo ninkii Ilaahay uga soo qaaday iyo ninkii Ilaahay u soo qaaday, quraanka uu meytada la duljoogo, mu'miniinta saas ah waa addoomada Ilaahay suubsaday.

Shirguddoomiyaha Magacaan SIYAARADA la leeyahay, sida uu u sheegay jaalle Ciise, kelimadu waa carabi. Kelmad soomaali ah haddii aan u doon doono aniga waxay ilatahay inay ku habboon tahay in la yiraahdo KULAN. Laakiin waxaa jira dad badan oo Shabeellayaasha iyo deggan oo yiraahda SUURID( abkiis la suure ).
Anigu labadaas eray ayaan ku saaidshay mawtakaalkii. Waxaa jira, marka siyaarada loo socdo, waa tii uu sheegay Dhegaweyne, in wiilkaa uu ku xusayo ee uu ku siyaaranayo, in JILIBKII uu waalidkii ay ka soo farcameen siyaaranayaan iyo in Awliyo la siyaaranayo. Marka waxaad moodaa inuu kala duwan yahay qasadka loo tegayo Siyaarada iyo kulanka. Wiil uu wax siyaaranayo yacni carruur ay

siyaaranayaan waalidkood waa wax waajib ah oo laga rabo oo laasin ku ah ayagana ay isku laasimeen oo ammaan iyo samaan meesha ma yaaliin ee waa waajib ay gudanayaan. Middaan jilibka la leeyahay, ee kulanka aan ulajeedo, marka la aadaayo waxay igula muuqataa inay tahay IS-ARAG ama GOGOL la fidsaday, shiikhuna waa jiri haddaayow. Yacni Kulanku waa meel la isku arko oo la isugu soo uruuro oo ballan la wada dhigtay oo ballankii haddii laga baaqdo ay si' noqonayso haddii la yimaadna ay si' noqonayso. Laakiin waxay u egtahay meel farax ah . Farax ayaa jooga maalinkaas. Maalinka jilibka la isugu yimaado waa maalin farax oo yacni kaftanku waa furan yahay, erayada la is-leeyahay xataa waa kalgaceyl.